



**Contact:**

**Tell:** +254-725375783  
+254-727614510

**E-mail:** [xoriyohrc110@yahoo.com](mailto:xoriyohrc110@yahoo.com)

**Ref:** .....

**Date:** ..13..../...09..../...06.....

**Bayaan ku wajahan xaaladda soomaaliya oo kasoo baxay xarunta [xoriyo.](#)**

Xarunta **Xoriyo** iyadoo afkaarteeda iyo mabaadi'deeda **ku Saleynaysa** Axdiga Qaramada midoobay, Baaqa Caalamiga ah ee Dhowrista Xuquuqda Aadanaha ,Axdiga Carabta ee ilaalinta xuquuqda Aadanaha , kan Afrika iyo kuwa kale ee lamidka ah.

Iyadoo xaruntu **ka shidaal qaadanaysa** heshiiska caalamiga ah ee khuseeya Xuquuqda Dhaqaalaha ,Bulshada iyo Dhaqanka kaasoo qodobka 1aad faqradiisa 1aad caddeynayso in shucuubtu xaq u leeyihiiin Aaya ka talinta arrimaheeda , isla mar ahaantaana ay xor u tahay yagleelida hannaanka iyo qaabka xukun ee iyaga raali gelinaya taasoo la saanqaadi karta duruufaha dhaqan/dhaqaale iyo bulsho ee Umadaas.

Iyadoo Xaruntu **maanka ku hayfa** in nidaam iyo kala dambeyn la,aanta Soomaaliya ka jirtey dhowr iyo tobankii sano ee lasoo dhaafay ay sababtay hoos u dhaca heerka daryeelka Xuquuqda Dadka, keentayna ku tumasho baahsan ee xuquuqda iyo xorriyadaha aasaasiga ah

Iyadoo Xaruntu **dareensan** tahay qaayaha iyo muhimadda ay leedahay dhameystirka dib u heshiisiinta si loogu talaabsado hawlahu dib u dhis iyo horumarineed ee dhinac walba looga baahan yahay.

Iyadoo xaruntu **bogaadinaysa** hawlahu wax-tarka leh ee u qabsoomay qaybaha Siyaasadda Soomaaliya (TFG iyo Midawga Maxkamadaha Islaamiga) ,iyadoo Midawga Maxkamaduhu ku guulaysteen inay meesha ka saaraan qabqablanyaashii dagaalka ee hortaagnaa nabadda ,xuquuqda dadka, hormarka iyo guud ahaan xoriyada. Taasoo albaabada ufurtay rajo iyo yididiilo cusub. halka Dawladda ku meelgaarka ahina xaqijisay guulo bilow ah sida dhinacyada maamul u samaynta qaar kamid ah goboladda iyo tababaridda Ciidamada qalabka sida iyo kuwa Booliska.

Iyadoo ka **damqanaysa** kala qeybsanaanta fikir iyo siyaasadeed ee dhinacyada kala duwan, taas oo ka hor imaaneysa Mabda'a ah in heybada qaranimo ey tahay lahaansho ey wadaagaan guud ahaan dadka, talaabo kasta oo taa ka duwana ey keeni karto dhaawac ku yimaado danaha guud ee bulshada.

**Sidaas darteed Xarunta Xoriyo waxay ku baaqaysaa si loo hanto guulahaas, loona xaqiijiyo rabitaanka shacbiga Soomaaliyeed in:**

**1-la dhiiri gelijo** mabada'a wada xajoodka oo **Xaruntu** u aragto inuu yahay wadiiqada kaliya ee fure u noqon karta xal uhelidda dhibaataada Soomaaliya . iyadoo **xaruntu** bogaadinayso heshiiska Maxkamadaha iyo Xukuumaddu 4tii bishan September ku gaareen magaalada Khartuum ee Dalka Suudaan, kuna dhiiri galinaysa dhinacyada kala Siyaasada ee kala duwan inay fuliyaan qdobada heshiiskaas

.

**2-la joojiyo** abaabulka colaadeed ee ifafaalahiisu muuqdo, kaasoo horseedi kara xadgudubyo ka dhan ah xuquuqda Aadanaha , caqabadna ku noqon kara dib u dhisidda kalsoonida bulshada iyo dib u soo nooleynta kaabayaasha nolosha .

**3-la tixgeliyo** kaalinta bulshada rayidku ku leedahay dib u dhiska iyo dib u heshiisiinta , lagana qayb gelijo go'aan ka gaarista aayaha bulshada ,si loo xaqiijiyo aragti ku saleysan xukun wanaag ,hufnaan iyo wada tashi, loona helo nidaam siyaasadeed oo ku dhisan cadaalad sinnaan iyo sharciga oo sarreeya, iyadoo maanka lagu haynayo ,lagana faa'iidayasanayo khaladaadkii sababay burburkii ku dhacay dalka sannadkii 1991kii, kaasoo Soomaalida ka dhigay bulsho ku fashilantey maamulka iyo siyaasadda.

**4-lagu saleeyo** siyaasadda gobolka mid ku qotonta wada noolaansho, deris wanaag, is ixtiraam iyo iskaashi dhinacyo badan taaban kara. kaasoo saldhig u noqon kara horumarka gobolka ,sidaas darteed Xarunta **Xoriyo** waxay ku baaqaysaa joojinta wax kasta oo keeni kara colaad ka qaraxda gobolka iyo kala fogaansho dhex marta bulshooyinka ku wada dhaqan degmada .

5-Ururada, hay'adaha iyo golayaasha u dooda xuquuqda ♦♦  
adanaha ay **fiiro gaar ah u yeeshaan** arrimaha ka taagan  
Soomaaliya, taageero farsamo iyo waxtarna la garab  
istaagaan guud ahaan bulshada Soomaaliyeed gaar ahaan  
kuwa ku hawlan dhawrista, dhiiri-gelinta iyo kor u qaadida  
wacyiga iyo dareenka bulshada ee ku aaddan xuquuqda  
Aadanaha

**Faysal Ciise Saleebaan**

**Xarunta nabadda iyo wadajiridda**